



Hagahaaga ku aadan codbixinta Doorashada Guud ee 2026



vote.nz



Waxyaabaha la filayo iyo sida loo codeeyo sannadka 2026

Xaqiiji in aad diiwaangashan tahay oo xogtaaduna ay tahay mida ugu cusub.

Si aad uga qaybqaadato doorashada guud ee 2026, waa inaad isdiiwaangelisaa ugu dambayn **saqda dhexe, ee Axadda 25-ka Oktoobar** Marka codbixintu bilaabato Isniinta 26-ka Oktoobar, ma awoodi doontid inaad isdiiwaangeliso ama cusboonaysiiso xogtaada.

Waa inaad isdiiwaangelisaa haddii aad tahay 18 sano jir ama ka weyntahay, muwaadin New Zealand ah ama degane sababo codayn la xiriiira, oo aad si joogto ah ugu noolayd New Zealand 12 bilood ama ka badan wakhti ka mid ah noloshaada.

Haddii aad si sharci ah ugu nooshahay New Zealand isla markaana aan lagaaga baahnayn inaad wadanka ka baxdo waqti cayiman markaas waxaad tahay qof codbixin kara.

Iska diiwaangeli, hubi ama cusboonaysii faahfaahintaada onlaynka

Isdiiwaangelintu ma aha wax hal mar un la sameeyo. Waa inaad mar walba cusboonaysiisaa diiwaangelintaada si aad ugu diyaargarowdo codbixinta.

Way fududahay in onlayn la iska diiwaangeliyo, laga hubiyo ama laga cusboonaysiiyo faahfaahintaada barta **vote.nz** adigoo isticmaalaya shatiga darawalnimada New Zealand, baasaboorka New Zealand ama aqoonsiga ay RealMe xaqiijiso.

Waxaad sidoo kale:

- Wici kartaa **0800 36 76 56** si aad u codsato foomka isdiiwaangelinta, ama
- Magacaaga iyo cinwaankaaga qoraal ahaan ugu diri kartaa **3676** si boostada laguugu soo diro foomka isdiiwaangelinta.

Kaarkaaga EasyVote

Haddii aad isdiiwaangeliso ugu dambayn Axadda 4-ta Oktoobar, waxaa laguugu soo diri doonaa kaarka EasyVote.

Haddii aad na siisay cinwaankaaga iimaylka, kaarkaaga EasyVote waxaa laguugu soo diri doonaa iimayl ahaan.

Haddii aan hayno oo keliya cinwaankaaga boostada, kaarka waxaa laguugu soo diri doonaa boostada.

Haddii aad ku jirto liiska cod-bixiyeyaasha ee aan la daabicin, waxaa boostada laguugu soo diri doonaa warqadda codbixinta.

Kaarkaaga EasyVote wuxuu ka dhigayaa codbixinta mid dhakhso badan oo fudud.

Weli waad codayn kartaa adigoo haysan, laakiin goobta codbixintu waxay kugu qaadan kartaa waqti yar oo dheeraad ah.

Haddii aad isdiiwaangeliso ka dib Axadda 4-ta Oktoobar, laakiin ka hor saqda dhexe, ee Axadda 25-ka Oktoobar, ma heli doontid kaarka EasyVote.

Goorta iyo halka laga codeynayo

Uma baahnid inaad sugto ilaa maalinta doorashada si aad u codayso.

Codbixintu waxay furmaysaa: Isniinta 26-da Oktoobar

Codbixintu waxay xirmaysaa: 7-da fidnimo maalinta doorashada, Sabtida 7-da Nofeembar

Goobaha codbixintu waxay furan yihiin laga bilaabo Isniinta 26-ka Oktoobar, ilaa Sabtida 7-da Nofeembar.

Waxaad ka heli kartaa macluumaadka ku saabsan goobaha codbixinta oo ay ku jiraan maalmaha iyo saacadaha ay furan yihiin, barta **vote.nz** ama waxaad wici kartaa **0800 36 76 56**.

Marka ay tahay maalinta doorashada, Sabtida 7-da Nofeembar, dhammaan goobaha codbixinta waxay furnaan doonaan 9-ka subaxnimo ilaa 7-da fidnimo.



Ma u baahan tahay macluumaad dheeraad ah?

- Booqo **vote.nz**
- Wac **0800 36 76 56**

Macluumaadka ku saabsan diiwaangelinta iyo codeynta ayaa sidoo kale la heli karaa iyagoo ku qoran luqado iyo qaabab kale oo laga heli karo **vote.nz**

Macluumaadkan la wadaag qoyskaaga iyo asxaabtaada, kana caawi inay u diyaargarobaan codbixinta.

Sida loo codeeyo

1 La imow kaarkaaga EasyVote

Kaarkaaga EasyVote ama warqadda cod-bixinta la imow maadaama uu kuu fududaynayo dedejinta codbixinta.

Haddii kaarkaaga EasyVote laguugu soo diray iimayl, waxaad la iman kartaa qalabkaaga oo shaashadda naga tusi kartaa kaarkaaga.

Haddii aad doorbidayso, waad soo dejisan kartaa, daabacan kartaa, ama sawir shaashadda ah ka qaadi kartaa kaarkaaga ka hor intaadan aadin goobta codbixinta.

Kaarkaaga EasyVote waxaa ku qoran xogtaada, adiga oo keliya ayaana isticmaali kara.

Weli waad codayn kartaa haddii aadan wadan kaarkaaga EasyVote markaad u tagto inaad codayso.



2 Waxaa jiri doona qof jooga goobta codbixinta oo ku caawinaaya

Shaqaalaha doorashada ee ku sugan goobtaada codaynta ayaa ku tusi doona waxaad samayn lahayd iyo meesha aad aadi lahayd.

3 Ka codee doorashada guud

Wagtiga doorashada guud, waxaad helayasaa laba codood – cod xisbiyeed iyo cod aad siiso musharax deegaankaaga ka taagan.

Codka xisbigaaga



Codka xisbigaagu waxaa loogu talagalay xisbi siyaasadeedka aad doonayso inaad taageerto.

Codayntani waxay inta badan go'aamisaa tirada guud ee kuraasta xisbi walba uu ka helayo Baarlamaanka. Xisbiyada saamiga ugu badan ku leh codka xisbiga ayaa kuraas badan ka heli doona Baarlamaanka.

Waxaad ka dooran kartaa isla liiska xisbiyada siyaasadda haddii aad ku jirto diiwaanka guud ama diiwaanka Māori.

Warqadaada codbixinta, sax saar magaca xisbi siyaasadeedka ee aad doorbidayso.

U codayntaada musharax deegaankaaga ka taagan



Codka aad siiso musharax ka taagan deegaankaaga waa in aad doorato musharaxa aad jeclaan lahayd in uu xubin Baarlamaan (MP) u noqdo deegaanka aad ku nooshahay.

Haddii aad ku jirtid liiska Māori, waxaad u codeyneysaa musharaxa u taagan codka Māori.

Haddii aad ku jirtid liiska doorashada guud, waxaad u codeyneysaa musharaxa u taagan doorashada guud.

Warqadaada codbixinta, sax saar magaca musharraxa aad si aad ah u jeceshahay inuu matalo aagga deegaankaaga. Musharraxa hela codadka ugu badan ayaa noqon doona xildhibaankaaga laga soo doortay deegaanka.



Qaybtan saamiga ah ee codadka xisbiga



Saamigaas oo kale ee kuraasta Baarlamaanka

4 Geli warqadaada codbixinta sanduuqa lagu siiyay ee warqadda codaynta

Taasina waa sidaas — waad codaysay!



Ma tagi kartid miyaa goobta codbixinta?



Haddii aadan tagi karin goobta codbixinta, tusaale ahaan, sababo la xiriira xanuun, da' ama naafanimo, waxaad heli kartaa taageero si aad u codeysno.

Haddii aad ku sugan tahay guri daryeel, Maareeyaha Doorashada ee degaankaaga ayaa la xiriiri doona xarunta daryeelka caafimaad si uu u habeeyo adeegyada codbixinta.

Haddii aadan tegi karin goobta codbixinta sababtoo ah isbitaal ayaad ku jirtaa, saaxiib ama xubin qoyskaaga ka mid ah ayaa soo qaadi kara waraaqaha codbixinta laga bilaabo Isniinta 26-ka Oktoobar.

Wax badan ka ogow barta **vote.nz** ama wac **0800 36 76 56** si aad ugala hadasho ikhtiyaaradaada.

Ka codaynta daafaha caalamka



Haddii aad Aotearoa New Zealand joogto marka codbixintu bilaabato Isniinta 26-ka Oktoobar, waxaa kuu fudud inaad codayso ka hor intaadan dalka ka bixin.

Haddii aad ka codaynayso daafaha kale ee caalamka, waa in lagu diiwaangeliyaa saqda dhexe, Axada 25-ta Oktoobar (waqtiga NZ). Waxaad iska diiwaangelin kartaa ama ka cusboonaysiin kartaa macluumaadkaaga barta **vote.nz**

Waxaad ka codayn kartaa daafaha caalamka laga bilaabo Arbacada 21-da Oktoobar ilaa 7 fidnimo, Sabtida 7-da Nofeembar (waqtiga NZ).

Habka ugu fudud uguna dhakhsiyaha badan ee aad daafaha kale ee caalamka uga codayn karto waa inaad soo dejisato oo aad buuxiso warqadaada codbixinta ka dibna aad soo galiso barta **vote.nz**

Waxa kale oo laga yaabaa inaad si fool-ka-fool ah uga codayn karto goob codbixineed oo dibadda ah. Liiska goobaha codbixinta ee dibadda waxaa laga heli doonaa **vote.nz**

Haddii xulashooyinkan aysan kuu shaqayn, fadlan iimayl u dir **overseas@vote.nz** ama wac **+64 9 909 4182** (waxaa laga yaabaa in lagugu dalaco kharashka wicitaanka caalamiga ah) si lagu u caawiyo.

Ma u baahan tahay in lagaa caawiyo akhrinta ama calaamadaynta waraaqahaaga codbixinta?



Saaxiib, xubin qoyskaaga ka mid ah, ama qof ka shaqeeya goobta codbixinta ayaa kaa caawin kara akhrinta ama calaamadeynta warqadda codbixinta. Qofkaasi ayaa awood u leh:

- inuu kula galo gadaasha shaashadda codbixinta
- inuu kuu akhriyo erayada iyo macluumaadka ku qoran warqada codbixinta
- inuu kuu calaamadeeyo warqadda codbixinta haddii aad sidaas weydiisato.

Looma oggola inay kuu go'aamiyaan qofka aad u codaynayso.

Haddii aad indhoole tahay, qayb ahaan indhoole tahay ama aad leedahay naafo jireed taas oo macnaheedu yahay in aadan calaamadayn karin warqaddaada codbixinta caawimaad la'aan, waxaad ku codayn kartaa adigoo isticmaalaya adeegga ka yeerinta khadka taleefanka.

Inaad isdiiwaangeliso ayaad u baahan tahay si aad u isticmaasho adeegan. Waxaad isdiiwaangelin kartaa laga bilaabo **5-ta Oktoobar** adigoo wacaya **0800 028 028** oo dooranaya ikhtiyaarka 1aad si aad isku diiwaangeliso, ama iimayl u diraya **dictation@vote.nz**

Booqo **vote.nz** si aad wax badan uga ogaato adeegan.

